


# Coronavirus **COVID-19**



## International Protection Accommodation Services (IPAS) COVID-19 Update



### Wararka COVID-19 ee Cusub



An Roinn Dlí agus Cirt  
agus Comhionannais  
Department of Justice  
and Equality

**25 Ogosto 2020**

## Wararkii ugu dambeeyay ee COVID-19 ee loogu talagalay degganayaasha - Cadadka 22

Degganeyaasha Qaaliga ah,

Fadlan hel cadadka ugu dambeeyay ee warsidahaaga. Cadadkan wuxuu. Bixinayaa warar cusub ee ku saabsan qorshaha Dowladda ee ah in si buuxda dib loogu furo dugsiyada. Waxaan ku dhiirigalinaynaa dhamaan waalidiinta caruurta aada-dugsiga inay wakhti ku qaataan si ay wax uga ogaadaan macluumaadka la bixiyey.

Warsidahan sidoo kale waxaa laga heli karaa [websaydka](#) xarumaha hoyga qaybta 'Degganeyaasha' oo ay weheliso daabacadihii hore ee ka hadlay mawduucyo ah sida ilaha waxbarashada iyo caafimaadka iyo talada faydaqabka.

Fadlan nala soo socodsii mawduucyada aad jeceshahay inaad ku aragto warsidayaasha mustaqbalka adiga oo noogu soo dira emayl [ipasinbox@justice.ie](mailto:ipasinbox@justice.ie).

Ugu dambeysta, waxaan jeclaan lahayn inaan kaaga mahadcelinno iskaashigaaga socda iyo aan kuu rajeynayno caafimaad wanaagsan.

## Kooxda IPAS

### Gaadiidka Dugsiga

Jimcahii, 21 Ogosto, Wasiirada Waxbarashada, Norma Foley TD, waxay diirada saartay in Qorshaha Gaadiidka Dugsiga uu u sii socon doono sida la qorsheeyey markii ay dugsiyada dib u furmaan iyadoo ay la socdaan tallaabooyin dheeraad ah iyo shuruudo nadaafo.



Heerka dugsiga hoose kadib, waxaa jiri doona hirgalin tallaabooyin dheeraad ah oo la jaan qaadaya kuwa looga baahan yahay gaadiidka dadweynaha, tusaale ahaan iyadoo la adeegsanayo boqolkiiba 50 (50%) awoodda rakaabka taasoo taageeri doonta shuruudaha kala fogaanshaha jireed.

Wadahadallo ayaa horeyba u socda oo lala sameenaya Bus Éireann oo la xiriira qorshooyinkaa, si loo hirgeliyo tallaabooyin ah si adeegyo kasta oo u hawlgali kara laga bilaabo bilowga sannad-dugsiyeedka awoodda rakaabka ee ah boqolkiiba 50 (50%) ay sidaa sameyn doonaan. Muddada soo socota, dhammaan adeegyada kale ee gaadiidka dugsiga hoose kadib dib ayaa loo abaabuli doonaa waxaana loo fidin doonaa adeegyo dheeraad ah sidii loogu baahan yahay si ay u oggolaao kala fogaanshaha jireed.

Carruurta u-qalma gaadiidka iyada oo la raacayo shuruudaha Qorshaha Gaadiidka Dugsiga oo waalidkoodna go'aansaday inaysan isticmaalin gaadiidka dugsiga hoose kadib ee sanad dugsiyeedka 2020/2021, iyadoo ka timid talo-bixinta caafimaadka ee ugu dambeeyay, Waaxda waxay siin doontaa deeq ku taageera kharashka ku baxa diyaarinta gaadiidka gaarka ah. Deeqaha waxaa la bixin doonaa dhammaadka sannad dugsiyeedka, ka dib marka la helo dukumiintiyada khuseeya, oo xaqiijinaya tirada maalmaha dugsiga ee la tagay sannad-dugsiyeedka 2020/2021. Kaalmadu waxay ku saleysan tahay masaafada ay qoysku u jiraan dugsigooda ay u qalmaan iyada oo ugu badnaan la siinayo maalintii lacag bixin ah € 5.10 maalintii.

Wasiirada Foley waxay sii wadi doontaa la shaqeynta Wasiirka Caafimaadka iyo Wasaaradaha kale ee Dowlada si loo aqoonsado iyo loo tixgeliyo ilaha dheeraadka ah ee looga baahan yahay in lagu taageero hergelinta tallaabooyinkaa.

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo hagitaan ku saabsan hawgalka Adeegyada Qorshaha Gaadiidka Dugsiga ee Sannad Dugsiyeedka 2020/2021, fadlan riix [halkan](#).

## Aqabyo loogu talagalay ardayda iyo qoysaskooda

Waaxda Waxbarashada iyo Xirfadaha waxay ardayda u soo saartay hagitaan ku habboon da'da oo ah qaab fiidiyow dhaqdhaqaaq ah oo loogu talagalay inay ka caawiso ardayda inay sii fahmaan qaar ka mid ah howlo maalmeedka cusub marka ay ku laabanayaan dugsiga. Hagid ayey sidoo kale waalidiinta ku heli karaan luqado kala duwan:



<https://www.gov.ie/en/publication/a04fc-advice-for-students-and-their-families/#information-in-your-language>.

Fiidiyowadaa dhaqdhaqaaqa ah waxaa laga heli karaa [www.gov.ie/backtoschool](http://www.gov.ie/backtoschool) waxaana loo dirayaa dugsiyada si loogu gudbiyo waalidiinta. Waaxda waxay sii wadi doontaa cusbooneysiinta dhammaan ilahaan wax ku oolka ah, sida iyo markii loo baahdo.

Iyada oo ka jawabeysa walaaca waalidiinta qaarkood laga yaabo inay ka qabaan eek u saabsan dib u furida dugsiyada, waxay tiri Wasiirada Foley:

*“Xaga Waalidiinta, waxaan fahamsanahay inaad dareemi kartaan walaac ku saabsan ku soo noqoshada ilmahaaga dugsiga. Waxaan ku nool nahay xaalad caadi ee cusub. Hasa ahaatee, waxaan diyaarinay dhammaan taxaddarrada lagama maarmaanka ah oo ay la socdaan dadaallada maamulayaasha iyo macallimiinta ee heer dugsi maxalliga, waxaad ku kalsoonaan kartaa in ilmahaagu ku laaban doono fasal nabadgelyo iyo soo dhaweyn leh.”*

Adeegga caalamiga ee COVID-19 wuxuu sidoo kale sameeyay fiidiyowyo la heli karo oo sharraxaya farriimaha ku noqoshada dugsiga ee muhiimka ah ee loogu talagalay waalidiinta: <https://nascireland.org/covid-19-world-service>.

Fiidiyowiyada waxaa ka hadlaya xirfadlayaasha waxbarashada oo ay ka mid yihiin macallimiin iyo SNA-yada ka shaqeeya Ireland.

Waxaad ku daawan kartaa fiidiyowiyadan **Ku laabashada Dugsiga (Back to School)** afafka Albaaniya, Amxaarada, Carabiga, Kaantoniiska, Katalaanka, Kurowashiyada, Jegka (Czech), Ingiriisiga, Faransiiska, Georgianka, Irishka, Talyaaniga, Hungarianka, Kurdishka, Soraniga, Latvian-ka, Lingala, Lithuanian-ka, Bolish-ka, Burtuqiiska, Romaniyada, Ruushka, Serbianka, Slovak, Isbaanishka, Ukranian-ka iyo Yoruba-da.

## War cusub ee loogu talagalay ardayda imtixaanka 2021

Wasiirada Foley ayaa sidoo kale bixisay war cusub oo loogu talagalay ardayda soo galaya sanadka saddexaad iyo kan lixaad ee gali doona imtixaanada dowlada ee xagaaga 2021.



Dukumintiga ayaa dejinaya qabanqaabida qiimaynta ee loo habeeyay ardaydaas ee dugsiga hoose kadib. Qabanqaabooyinkan ayaa loo qaabeeyey inay xisaabta ku darsadaan carqaladeynta waxbarasho ee ay ardyadan la kulmeen sanad dugsiyeedka 2019/20.

Wax ka beddelidaa waxaa lagu heshiiyey iyadoo ay ka wada hadleen Waaxda, Guddiga Imtixaannada Wadanka (State Examinations Commission - SEC) iyo Golaha Qaranka ee Manhajka iyo Qiimeynta (National for Curriculum and Assessment - NCCA) iyo daneeyayaasha muhiimka ah.

Iyadoo dugsiyadu leeyihiin madax-bannaanid weyn ee xagga go'aaminta sida ay isugu xigaan iyo xawaaraha barashada ee ardayda dugsiyadooda, ma jiro wax-ka-beddelid guud oo loo sameeyey manhajka iyo koorsooyinka waxbarashada oo waxtar u leh ardayda galaya imtixaannada shahaadada ee xagaaga 2021.

Sidaa awgeed, habka ugu habboon ee loo eego loona tixgeliyo caqabadaha ay la kulmeen ardayda ee dhacay sannadihii 2019/20, oo dhici kara sannadka 2020/21, waa in lagu daro wax ka beddelida imtixaannada shahaadada ee 2021. Wax-ka-beddelada la sameeyay ayaa la socon doona awooda ardayga iyadoo la ilaalinayo qaab dhismeedka guud ee la yaqaan ee imtixaanada iyadoo lagu darayo xulasho dheeraad ah. Qabanqaabinta qiimeynta waxay siinaysaa ardayda, waalidiintooda / masuuliintooda, macallimiintooda iyo dugsiyadooda caddayn, hubaal iyo kalsooni si horey ah bilowga sannad-dugsiyeedka 2020/2021.

Dukumiintiyadaan waxaa laga heli karaa halkan:

<https://www.education.ie/en/Schools-Colleges/Information/Curriculum-and-Syllabus/assessment-arrangements-junior-cycle-and-leaving-certificate-examinations-2021.pdf>

<https://www.education.ie/ga/Scoileanna-Coláistí/Eolas/Curaclaim-agus-Siollabas/socruithe-measunachta-do-na-scrduithe-teastais-2021.pdf>



Fadlan noogu soo sheeg [IPASinbox@justice.ie](mailto:IPASinbox@justice.ie) haddii ay jiraan mowduucyo kale oo aad jeclaan lahayd inaan ku soo darno wargeyskeena. Waxaan rajeyneynaa in macluumaadka halkaan lagu bixiyey ay ahaayeen mid wax tar leh.

**Iyadoo aan kuu rajayneyno rajo aad u wanaagsan oo ka socda kooxda IPAS iyo Waaxda Caddaaladda iyo Sinaanta.**



An Roinn Dli agus Cirt  
agus Combionannais  
Department of Justice  
and Equality

*Macluumaadka ku qoran warbixintan ugu dambaysay waxaa loogu talagalay degganayaasha xarumaha hoyga IPAS, Saaxiibada Kooxaha Xarunta (Friends of the Centre Groups) iyo asxaabta NGO-yada. Wixii su'aalo ah ama fikrado ah waxaa loo diri karaa [IPASinbox@justice.ie](mailto:IPASinbox@justice.ie)*